



Cusboonaysiinta Qorshaha Ganacsiga Istaraatiijiga ah ee 2025-2030

FULINTA KOOBAN

Farriinteenna kugu socota adiga

Maalin kasta, Seattle Public Utilities (SPU) waxay bixisaa adeegyada biyaha iyo qashinka ee muhiimka ah. SPU waxaa ka go'an ka ilaalinta kheyraadkayaga dabiiciga ah isbedelka cimilada iyo wasakhawga, ilaalinta nidaamkayaga adeegyada iyo maalgashiga bulshooyinkayaga.

Waa Maxay Sababta aan u Cusboonaysiineyno Qorshaheena

Qorshaha Ganacsiga Istaraatiijiga ah ee SPU (SBP) wuxuu naga caawiyaa inaan diirada saarno shaqadeena. Wuxuu ku dhismaa awoodeena oo haggaa ficiladeena si aan u bixino adeegyada muhiimka ah. Qorshe kasta oo ganacsi waxa uu daboolayaa shaqada la soo jeediyay ee lagu dhammayn doono lix sano gudahood. Waxa la cusboonaysiiyaa saddex sano kadib.

Cusboonaysiinta qorshahan ganacsi, waxaanu dib u eegi doonaa yoolalkayaga, waxaanu ku siin doonaa warbixin ku saabsan horumarka aanu samaynay saddexdii sano ee la soo dhaafay waxaana aanu ku dhawaaqi doonaa isbedelada ku imaan kara qiimaha adeegyada ee mustaqbalka.

Hawlgalkeenna

Adeegyada Dadweynaha Seattle waxay kobciyaan dadka caafimaadka qaba, deegaanka, iyo dhaqaalaha iyadoo iskaashi la samaynaya bulshadeena si aan si siman u maareyno khayraadka biyaha iyo qashinka maanta iyo jilka soo socda.

Hiigsigeenna

Bulshada Yoolka Lasaaray, Biyo Hal ah, Wasakh Eber ah

Mabaadi'dayada Hagida

Macaamiisha iyo Bulshada

La awoodi karo iyo la xisaabtanka

Khatarta iyo Adkeysiga

Sinnaanta iyo Awood-siinta

Adeegga iyo Badbaadada

Meelaha Diirad-saarista iyo Yoolalkeenna

Diirada saar: Bixinta Adeegyada Muhiimka ah ee loo siman yahay

Hadafkayagu waa:

- Bixi adeegyo la isku halayn karo, tayo leh oo buuxinaya shuruudaha iyo ballanqaadyada
- Maalgelinta adeegyada la hagaajiyay ee dhammaan bulshooyinka

Xeeladahayagu waa:

- Bixi macluumaad waxtar leh iyo tas-hiilaad kana saar caqabadaha si shaqaalaha adeeg bixinta safka hore ay u guulaystaan.
- Mudnaan sii oo taageer helida adeegyada muhiimka ah ee loo siman yahay.

Diirada saar: Ilaalinta Deegaanka iyo Caafimaadka

Hadafkayagu waa:

- Kobcinta wacyigelinta biyaha iyo adkeysiga laga bilaabo biyo-dhacyada, ilaa magaaloyinka, ilaa Puget Sound.
- Horumarinta "dhaqaale wareegaya" kaas oo ka caawiya baabi'inta qashinka iyadoo dib loo soo celinayo, dib u habeyn, iyo dib u warshadeyn.

Xeeladahayagu waa:

- Maalgelinta qorshayaasha, mashaariicda, iyo barnaamijyada lagu ilaalinayo biyaheenna.
- La shaqee bulshooyinka si ay ula qabsadan isbedelka cimilada.
- Iska yaree isticmaalka walxaha oo ka hortag wasakhowga biyaha iyo kaarboonka.

Diirada saar: Xoojinta Macaamiishayada, Bulshada, iyo Shaqaalaha

Hadafkayagu waa:

- La wadaag macaamiisheena iyo bulshadayada.
- Noqo mac'had horumariya sinnaanta oo bixiya dheefaha bulshada.
- Maalgeli dhammaan shaqaalaheenna.

Xeeladahayagu waa:

- Bixi caawimada adeegyada taas oo isbedel fiican samaynaysa.
- Xooji oo taageer macaamiisha.
- Ku hogaami sinji iyo cadaalad bulsho. Si cadaalad ah u maalgali bulshooyinka.
- Noqo goob shaqo oo cadaalad u ah dhammaan shaqaalaha

Diirada saar: Xoojinta Dhaqamada Ganacsi ee Adeegyadeenna

Hadafkayagu waa:

- Ka dhig qiimaha adeegyada wax la awoodi karo.
- U maamul hantida iyo khataraha sida ugu wanaagsan.
- Kobci dhaqan horumarin.

Xeeladahayagu waa:

- Ku bixi ballanqaadyadeenna.
- Hagaaji tas-hiilaadka si loo hubiyo bixinta adeegga.
- Taageeri hal-abuurka.

Sicirrada Adeegyada Mustaqbalka

Sicirrada SPU way u kordhi doonaan si ay ula socdaan kharashyada. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan hoos u dhigno kororkaan annagoo yareynna kharashaadka iyo inaan si hufan u shaqeyneyno inta aan maalgelineyno hantida oo aan ka saarno caqabadaha helitaanka adeegga. Waxaan sidoo kale raadinaa ilo kale oo maalgelin ah, u dhisno si hufan, oo aan u maareyno nidaamkeena si aan u yareyno khatarta una abuurno faa'iido dadweyne.

Arrimaha Saameynaya qiimaha

SPU waxay dejisaa qiimayaasha iyadoo daraaseynaysa kharashaadka, khataraha, iyo dakhliga soo gala.

Waxaan xaddidnaa kororka kharashka adeegga iyadoo:

- la beddello tas-hiilaadka da'da ah si looga fogaado cilladaha qarashka badan,
- la yareeyo qashinka,
- la isticmaalayo tignoolajiyada cusub si loo horumariyo waxtarka,
- la sii qorsheeyo dib u cusboonaysiinta dhumaha, kaydada, saldhigyada bamka, dhismayaasha, iwm.
- si fiican loo maareeyo lacagta,
- laga gorgortamo sicirrada hooseeya ee qandaraasyada, iyo
- la yareeyo qiimaha lacagta laga soo amaahdo suuqyada curaarta.

Si kastaba ha ahaatee, dhowr arrimood ayaa kordhin kara kharashka waxayna ka saari karaan kaydinta. Kuwaas waxaa ka mid ah sicir-bararka, xeerarka, nidaamyada gabowga, kororka heerka dulsaarka, iyo shuruudaha kharashka qandaraasyada.

Dariiqa Qiimaha Saddex-sano iyo Saadaasha

Dariiqa sicirka lixda sano ee SPU waa la cusboonaysiiyaa saddexdii sanaba mar. Celcelis ahaan kororka sicirka sanadlaha ah ee 2025-2030 waa 4.7 boqolkiiba, marka loo eego 4.2 boqolkiiba 2021-2026.

Shaxda 1: 2025-2030 Celceliska Qiimaha Korodhka

	Dariiqa Qiimaha la gorsheeyay			Saadaasha Qiimaha Macquulka ah			
	2025	2026	2027	2028	2029	2030	Celcelis ahaan
Biyo	2.0%	2.0%	6.3%	3.3%	6.5%	3.8%	4.0%

Biyaha wasakhda ah	5.0%	5.0%	5.0%	6.2%	7.0%	5.1%	5.5%
Tuubooyinka biyaha roobka qaada	5.0%	5.0%	5.1%	6.6%	6.3%	7.2%	5.9%
Qashinka Adag	2.5%	3.1%	3.4%	3.4%	3.8%	2.5%	3.1%
La-isku-daray	3.7%	3.9%	4.9%	5.0%	6.0%	4.6%	4.7%

Isku-celceliska sare u kaca sicirka sanadlaha ah waxa uu ku salaysan yahay dhawr arrimood:

- Kordhinta kharashka daaweynta biyaha wasakhda ah ee Degmada King ee Magaalada Seattle;
- Sicir bararka oo kordhay; iyo
- Kharashyada xeerarka, nidaamyada duqoobaya, korodhka qiimaha dulsaarka.

Saameeynta Biilka

Tani waa inta aad fili lahayd in kharashaadkaaga adeegyadu uu kordho. SPU waxay danaynaysaa saamaynta sicirka ku kordha macaamiisheena. In biilasha hoos loo dhigo waa muhiim, waxaan aad uga shaqaynaa si aan u samayno koror la saadaalin karo, oo aan siino kaalmo dhaqaale kuwa u baahan.

Shaxda 2 waxay muujinaysaa saadaasha kharashyada caadiga ah ee billaha ah ee macmiilka guriga keliya ee qoyska (biilasha SPU waa laba-biloodle).

<i>Shaxda 2: Saadaasha Qiimaha Caadiga ah ee billaha ee Guriga Qoyska Keliga ah</i>						
	2025	2026	2027	2028	2029	2030
Biyo	\$50	\$51	\$54	\$56	\$60	\$62
Bulaacada	\$83	\$87	\$92	\$97	\$104	\$109
Tuubooyinka biyaha roobka qaada	\$63	\$66	\$69	\$74	\$78	\$84
Qashinka Adag	\$60	\$62	\$64	\$66	\$68	\$70
La-isku-daray	\$256	\$266	\$279	\$293	\$310	\$325
Isbeddelka billaha ah ee sannadkii hore	\$11	\$10	\$13	\$14	\$17	\$15

* Kharashka bulaacadda waxaa lagu dalacayaa macaamiisha bayaannada canshuurta hantida ee Degmada King.

Kaalmada Dhaqaale ee Macmiilka

Waa inaad heshaa adeegyada muhiimka ah iyadoon loo eegin inta lacag ah ee aad haysato. Tani waa sababta ay naga go'an tahay in aan hoos u dhigno kharashyada mid aad muhiim u ah. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan arrimaha kuugu fududeyno. Waxaan bixinaa kaalmo biil iyo barnaamijyo kaa caawinaya inaad lacag kaydso, oo ay ku jiraan:

- **Macluumaad** ku saabsan sida loo yareeyo kharashaadka adeegyada;
- The **Utility Discount Program**, kaas oo ka caawiya macaamiisha dakhligoodu yar yahay inay bixiyaan biilasha adeegyada haddii loo baahdo;
- **Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah** , kaas oo ka caawiya macaamiisha dakhligoodu yar yahay biilasha aan la bixin;
- **Qorshayaasha lacag-bixinta** si loo fududeeyo bixinta biilasha adeegyada; iyo
- **Sanduuqa Deeqaha Bulshada** ee SPU, kaas oo u oggolaanaya macaamiisha SPU inay is caawiyaan.

Wax badan ka ogow

Cusboonaysiinta Qorshaha Ganacsiga Istaraatiijiga ah ee 2025-2030 oo buuxa waxaa laga heli karaa <https://www.seattle.gov/utilities/about/plans/strategic-business-plan>.